

Horay u sii bixinta Lacagta



Waa Maxay horay u sii bixinta Lacagtu?

Haddii aad qaadato lacagta damaanada bulshada ama Family Tax Benefit Part A, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato inay horay lagu sii siiyo qayb ka mid ah lacagta labada-asbuuc ah si duuduub ah. **Uma baahnid inaad u sheegto Centrelink sababta aad ugu baahan tahay in lagu horumariyo.** Lacagta horumariska ah waa in dib loo bixiyaa shuruucda lagu helo lacag horumaris ahna waxay ku xiran tahay nooca ama habka aad ku qaadato lacagta.

Waxaa jira dhowr nooc oo ah lacagaha horumariska lagu bixiyo, labada ugu caansan oo horay loo bixiyaana waa:

- lacagta social security, **iyo**
- Family Tax Benefit Part A.

Noocyada kale oo Lacagaha Horumariska ahi waa

- Horumariska Special Employment waxayna kaa caawintaa waxyaallaha ay waajibka tahay inaad hesho markaad shaqo bilaabayso haddii aad hadda bilawday shaqaynta welina aan lacag lagu siin
- Horumariska Mobility Allowance, **iyo**
- Horumariska Pharmaceutical Allowance.

Si aad u qaadato lacag horumaris ah ee lacagtaada damaanada bulshada waxaa waajib ah inaad qaadato lacagaha soo socda midkood

Si aad u qaadato lacag horumaris ah ee lacagtaada damaanada bulshada waxaa waajib ah inaad qaadato lacagaha soo socda midkood

- ABSTUDY
- Parenting Payment (Lamaane)
- Age Pension
- Parenting Payment (Keli)
- Austudy Payment
- Widow Allowance
- Carer Payment
- Widow B Pension
- Disability Support Pension
- Wife Pension
- Newstart Allowance
- Youth Allowance.

Si aad xaq ugu yeellato Lacagta Horumariska ah ee hawlgabka damaanada bulshada ama lacagta gunada ah waxaa waajib kugu ah:

- inaad qaadansay gunada ama hawlgabka ugu yaraan saddex bilood
- aan lagugu lahayn deynta Dawlada Dhexe (taasi kuma jirto Horumariska Family Tax Benefit)
- inaad awoodo dib u bixinta Lacagta Horumariska ah welina helayso lacag kuugu filan baahidaada labada asbuuc.

Markaad xisaabinayso kharajyada qadari arrimaha soo socda:

- lacagaha Ijaarka ama moorgayjka
- cuntada
- lacagaha deynta
- caymiska guriga/gaariga/alaabta ee asaasiga ah
- korontada/gaaska
- telefoonka
- cashuurta
- batroolka
- daawooyinka
- daryeelka ilmaha
- lacagta lagu bixiyo dugsiga
- Kaararka deynta
- cashuuraha (dhulka, biyaha iyo bulaacada)
- dharka, **iyo**
- madadaalada.

Si aad xaq ugu yeellato Lacagta Horumaris ah oo Family Tax Benefit waxaa waajib kugu ah:

- inaad xaq u leedahay Family Tax Benefit Part A ee labada-asbuuc, heer la mid ah ama ka badan labanlaabka heerka Horumariska Family Tax Benefit
- in aan lagugu lahayn deyn Dawlada Dhexe (taasi kuma jirto Lacagta Horumariska ah ee Damaanada Bulshada).



Ilaa intee in le'eg ayaad heli kartaa immisa ayaadse heli kartaa Lacagta Horumariska?

Lacagta Horumariska ah cadadkeeda waxaa xadada intuu noqon karo nooca iyo heerka lacageed oo aad ka qaadato Centrelink. La xiriir Centrelink si aad u ogaato intaad heli karto.

Lacag Horumaris ah oo duuduub ah ayaa lagu bixiyaa lacagta mustaqbilka oo aad xaqa u lahayd ee labada asbuuc.

Tirada Lacagaha Horumariska ah oo aad heli karto 12kii bilood waxay ku xiran tahay nooca lacagta ah oo aad qaadato iyo haddaad horay u qaadatay lacag horumaris ah.

Nooca lacagta	Ilaa intee jeer ayaa lagu sii karaa Lacag Horumaris ah ah?	Waa maxay xadka inaad heli karto?
Family Tax Benefit Part A	Waxaad heli kartaa keliya Lacag Horumaris mudada Caadiga ee Lacag Horumariyo. Waxa jira laba horumaris; 1da Janaayo ilaa 30ka Juun iyo 1da Juulay ilaa 31ka Diseembar.	Lacagta Horumariska ee aad helayso waxay ku salaysan tahay kalabar heerka ilmaha ka yar 18 sanadood ee Family Tax Benefit. Intaad heshaa waxay ku xirnaan doontaa inta ka harsan mudada Lacagta Horumariska ah.
Age Pension Disability Support Pension Carer Payment Widow B Pension Wife Pension	Lacagta waxaa loo qaadan karaa halmar oo horumarin ah, ama waxaa lagu soo yarayn karaa saddex horumarineed muddo lacag qaadis dhan 13jeer labadii asbuucba hal mar (lix bilood).	Lacagta ugu badan waxaa loo qoondeeyey saddex asbuuc lacagtood asaasiga ugu badan hawlgabka oo lagu daray lacag qayb ka mid ah inta Wehelisa Hawlgabka. Lacagta ugu yar waxaa loo qoondeeyey hal asbuuc lacagtiis in le'eg inta ugu badan lacagta asaasiga ah oo lagu daray qayb ka mid ah Lacagta Wehelisa Hawlgabka. Lacagahaani waxa lagu xiriirin doona siyaadinta lacagta la siiyo qofka qaangaarka ah, sidaas darteed lacagta ugu yar iyo tan ugu badan lacagta horumariska ah waxay la jaan qaadaysaa kordhinta hawlgabka bilaha Maarso iyo Sebteembar.
ABSTUDY Austudy Payment Newstart Allowance Parenting Payment (Lamanaane) Parenting Payment (Keli) Widow Allowance Youth Allowance	Hal mar 12kii biloodba.	Lacagta ugu badani waa \$500. Inta ugu yari waa \$250.

Sidee loo bixiyaa Lacagta Horumariska ah?

Lacagta Horumariska ah waxaa toos loogu shubaa isla akootiga aad lacagta Centrelink ku qaadato.

Waxaad weydiisan kartaa Lacagta Horumariska ah ee damaanada in la kala qaybiyo oo lagaaga dhigo laba qaybood.

Waxaad weydiisan kartaa Horumariska Family Tax Benefit oo ah lacag hal mar ah ama waxaad weydiisan kartaa in loo bixiyo si awtomaatik ah mudada horumariska Family Tax Benefit; bil walba oo ah Janaayo iyo Juulay waase inaad xaq u leedahay lacag bixinta.

Sidee lacagta Horumariska ah lagu celiyaa?

Lacagta lagu siiyey si horumariska ah waa in dib loo bixiyaa. Lacagta waxaa laga goyn doona lacagtaada labada-asbuuc halka mar la bixiyo ilaa lacagta oo dhan lagaa gooyo.

Lacagaha Horumariska ah ee damaanada bulshada waxaa dib loo bixiyaa 13 jeer ku salaysan labada-asbuuc mudada lacagta Horumariska ah ee Family Tax Benefit-ka aad ku heshay horumarinta. Haddii lacagta aad qaadataa istaagto inta ka harsan waxaa lagaaga qaadi doona deyn ahaan.

Dalbashada Lacagta Horumariska ah

Waxaad awoodaa inaad ka dalbato online-ka adigoo booqanaya websaytka Centrelink oo ah www.centrelink.gov.au ama wac adeega online-ka ah ee shakhsiyeed oo Centrelink tel: **13 6240**. Waxaad kaloo ka wici kartaa Centrelink mid ka mid ah nambarda telefoonada hoos ku qoran ama Xarunta Adeega Macmiilaha ee Centrelink.

Caawimada kale haddaad u baahan tahay kaalmo dhaqaale ama ku jirto xaallad adag

Marka kharaj aan la filayn yimaado ama dhibi dhacdo, Centrelink waxaa laga yaabaa inay caawimo kuugu fidiyaan bulshada dhexdeeda waxtar degdeg ah, talo beekhaamineed ama ku siiyaan lacag degdeg (Urgent Payment) ama Crisis Payment. La hadal Centrelink wixii ku saabsan xaalladaada si aad u hesho caawimada la heli karo.

Sida loo ogaado wax intaas ka badan

Adeegyada Shaqada	13 2850
Adeegyada dhalinta iyo ardada	13 2490
ABSTUDY	13 2317
Waalidka ama masuulka	13 6150
limaha, jirooyinka iyo daryeelayaasha	13 2717
Dadka waayeelka ah	13 2300
Xarunta Wicida dadka Asaliga ah	13 6380
(waxay ka jiraan keliya NT, North QLD iyo WA)	
Xiriirka Macmiilaha	Lacag la'aan™ 1800 050 004
Macluumaadka luqadaha aan ka ahayn Ingiriiska	13 1202
Adeegyada Xukuumada Australia ee Khadka ku wargelinta khaainimada	13 1524
Waxweydiinta lacagaha ee TTY*	Lacag la'aan™ 1800 810 586
*TTY waxaa loogu talagalay dadka dhegaha la' keliya ama qaba dhibta maqalka. Telefoonka TTY waxaa looga baahan yahay inuu isticmaalo adeegaan.	
Si aad ballan u samaysato wac	13 1021

Muhiim: wicida nambarda ka kaca '13' oo laga soo diro adeega telefoonka caadiga ah waxaa laga soo diri karaa meel kasta oo Australia ku taal qiima aan ka badnayn halkaad joogto (qiimaha oo dhami waa isbedeli karaan iyada oo ku xiran bixiyaha adeega telefoonka). Telefoonada ka kaca '1800' waa lacag la'aan. Telefoonada laga soo diro moobaylka iyo telefoonada waxaa laga yaabaa in la iska qaado qiima aad u sarreeya.

Afeef

Macluumaadka qoraalkaan ku yaallaa wuxuu ahaa sax taariikhdu markay ahayd Juulay 2010, laakiin waa is bedeli karaa. Haddii aad isticmaasho qoraalkaan taariikhdaas ka dib, fadlan ka hubi Centrelink in faahfaahinta taariikhdu ay sax tahay.